

SU'AALAHA HAD IYO GOOR LA'IS WEYDIYO: FMP - HIRGALINTA QORSHAHA SHANTA SANO EE SOO SOCOTA

Waa maxay Facilities Master Plan (FMP)?

Facilities Master Plan (FMP) waxay siinayasa Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul (SPPS) hagitaan iyo tilmaamo ku saabsan 72'da dhismayaal iyo 465'ta higtar ee dhulka ah ee dagmada 10 ka sano ee soo socda (2016-2026). FMP waxay ku hagaysaa dagmada (SPPS) go'aamada dhaqaalaha ee dhinaca mashaariicda dhismayaasha dagmada, iyadoo islamarkaana la xaqiijinayo in dhismayaasha iskuulladu la jaan-qaadi karaan baahida ardayda.

FMP waxay ka dhalatay fikrada in ka badan kun qof, oo isugu jira arday, qoysas, shaqaale, xubno ka tirsan bulshada, laga soo billaabo May 2014 ilaa Diseembar 2015. Fikradahan ayaa waxaa ka dhashay – [Aragtiyada](#), [Ahdaafta](#) iyo [nidaamka](#) hogaaminaya FMP. Dugsi walba wuxuu sameeyey koox soo qiimeysa baahida dayactir ee dhismohoodu u baahanyahay.

Sidee bay dhismayaashu u taageeraan waxbarashada ardayda?

Dhismayaashu ma'ahan kaliya inay ahaadaan goob diiran, laakiin waxaa sidoo kale muhiim ah inay noqdaan goob taageerta qaabab kala duwan oo waxbarasho. Boqolkiiba lixdan dhismayaasha SPPS waxay dhisanyihiin in kabadan 60 sano. Waxaa muhiim ah inay dhismayaasheenu la jaanqaadi karaan baahida waxbarasho ee sii casriyoobaysa. [Daawo fiidiyowgan ah labada daqiiqo si aad u fahamto qaabka ay dhismayaasheenu u taageeri karaan qaababka kala duwan ee waxbarasho.](#)

Dugsigeygu muxuusan uga mid ahayn qorshaha dayactirka ee shanta sano? Ma laga yaabaa inuu ka mid noqdo?

Sida hoos ku xusan, dhowr iskuul ayaan qayb ka ahayn qorshayaasha dib-u-habaynta shanta sano ee soo socota, laakiin dugsiyadan waxay marwalba helayaan dayactirka asaasiga ah, sida kor u qaadida hawlaha la xiriiraa dhinaca ammaanka iyo

Fadlan ogow liistada mashaariicda shanta sano ee soo socota waxay [Facilities Master Plan Committee \(FMP-C\)](#) ku samayn doontaa dib-u-eegid sanadle ah si loo eego arrimaha saamaynta ku yeelan kara qorshaha naqshadaynta.

Battle Creek Elementary
Central Senior High School
Eastern Heights Elementary
Four Seasons Arts+
Hazel Park Preparatory
J.J. Hill Montessori
Mississippi Creative Arts
Randolph Heights Elementary
Benjamin E. Mays IB World School (Rondo Complex)
Capitol Hill (Rondo Complex)

Goorma ayey mashaariicda dhismaha ee iskuulkaygu dhammaystirmayaan?

[Mashaariicda dhismayaasha ee dugsi walba iyo xilliyada ay qorshaysanyihiin halkan ayey ku qoranyihiin.](#)

Sidee baan ku arki karaa qorshayaasha mashaariicda dib-u-habaynta iskuulkayga?

Dhismo walba iyo mashaariicda loo qorsheeyay waxay ku daabacanyihiin [barta FMP](#).

Sidee baan uga qayb qaadan karaa mashaariicda FMP ee iskuulkayga?

Iskuul walba wuxuu leeyahay [Guddiga Naqshadaynta Iskuulka](#) oo ay hogaaminayaan injineero iyagoo kormeeraya shaqada dib-u-habaynta dhismayaasha.

Sidee bay Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul ku bixin doonaan kharashaadka mashaariicda dayactirka dhismayaasha?

Laga soo billaabo 1989, Guddoonka Waxbarashadu waxay u codaynayeen wanaajinta dhismayaasha taas oo markaa saamayn ku yeelata canshuuraadka la qaado. Canshuuraadkani waxay u ogolaanayaan degmadu inay hesho dakhli lacageed oo ay ku kharash gareeyaan mashruucyada la xiriira hagaajinta dhismayaasha degmada si loo daboolo baahida waxbarasho ee ardayda.

Maalinta Talaadada ah, bisha Abriil 26, 2016, waxay Guddoonka Waxbarashadu cod u qaadi doonaan qorshaha mashaariicda dhismayaasha ee shanta sano ee soo socota, iyadoo goor dambe oo sanadkan ah lagu soo dari doono shaqada geedi socodka miisaaniyadda sanadlaha ah ee degmada.

Maxaa maalgalinta dhismayaasha loogu isticmaali la'yahay in lagu taageero waxbarashada fasallada?

Maalgalinta dhismayaasha waxaa loo isticmaala in lagu dayactiro dib-uhabayna loogu sameeyo dhismayaasha iyo dhulalka degmada. Lacagtan laguma bixiyo kaliya in dhismayaashu noqdoon meelo nadiif ah oo dirran, laakiin sidoo kale inay noqdaan goobo u diyaarsan wax-ka-qabadka baahida waxbarasho ee ardaydeena.

Sida sharcigu qabo, maalgalinta dhismayaasha looma isticmaali karo hawlo kale oon ka ahayn dhismayaasha. (hoos fiiri) sida maalgalinta guud oo lagu bixiyo mushaaradka macallimiinta, gaadiidka iyo hawlaha kale ee waxbarasho. **Badashada/koroka maalgalinta dhismayaashu wax saamayn ah kuma yeelanayso maalgalinta guud.**

Maalgalinta dhismayaashu waxay ka tahay 4% miisaaniyada guud ee SPPS waxaana laga maal galiyaa iibinta damaanaadka iyo qaadashada amaahyaha (oo ay ka mid tahay canshuuraha guryaha, eeg su'aasha 7)

MIISAANIYADDA GUUD EE SPPS 2015-16: \$697,800,000

The budget is made up of the following categories:

Maalgalinta Guud (\$562.2M)
Adeegyada Deymaha (\$55.8M)
Maalgalinta Dhismayaasha (\$27.4M)
Adeegyada Cuntada (\$25.7M)
Adeegyada Bulshada (\$26.7M)

